

# Caawiyaha Kalkaaliyaha

## Waxaad Ka Fekertaa Shaqo ah Daryeelid oo leh Mustaqbal

*Ku raaxeyso shaqo ah daryeelka  
caafimaadka oo ah mid wax weyn  
ka beddeleysa nolosha dadka*



Sameynta daryeel aasaasi ah ee dad xarun ku jira iyadoo ay ku haggayaan shaqaalaha kalkaalinta. Sameynta hawlo ah sida cunto-siinta, qubeyska, dharka, shanleynta, wareejinta dadka xarunta, caawinta isticmaalidda musqusha, ama beddelka go'yaasha. Waxa laga yaabaa in dadka laga wareejiyo sariir ilaa kursiga curyaanka, oo waa la qaadi karaa. Shaqadan waxa laga yaabaa in ay kugu habboon yahay haddii aad jeceshahay inaad la shaqeyso dad badan oo kala duwan oo uu goobta joogo maamule ama saaxiib aad su'aalo weydiin karto.

**SHAQOOYINKA KALE EE LA MIDKA AH DARYEELKA IYO CAAWINA:** Geriatric Nursing Assistant (Caawiyaha Kalkaalinta Waayeelka ama GNA), Licensed Nursing Assistant (Caawiyaha Kalkaalinta Leysanka Haystaama LNA), Nurse Aide (Gacanyareha Kalkaaliyaha), Nursing Aide (Gacanyareha Kalkaalinta), State Tested Nursing Assistant (Caawiyaha Kalkaalinta Gobolku Soo Imtixaamay ama STNA), Certified Nursing Assistant (Caawiyaha Kalkaalinta Haysta Aqoonsiga ama CNA), Certified Nurse Aide (Gacanyareha Kalkaaliyaha ee Haysta Aqoonsiga ama CNA), Certified Medication Aide (Gacanyareha Bixinta Daawada ee Haysta Aqoonsiga ama CMA), Gacanyareha Caafimaadka Guriga, Shaqaalaha Guriga, Daryeelaha Guriga Gudihisa, Daryeele, Gacanyareha Daryeelka Guriga, Gacanyareha Guryaha Sakaraadka, Nursing Assistant Registered (Caawiyaha Kalkaalinta ee Diwaangashan ama NAR), Caawiyaha Dadka Guryaha



**Hadda waxaa baahi weyn loo qabaa shaqaalaha Caawiyeyaasha Kalkaaliyaha.** Taas macnaheedu waa inay hadda goobaha shaqada shaqaale raadinayaan. Waxaa la filayaa in ay baahida badan ee Caawiyeyaasha Kalkaaliyaha sii badan doonto tobanka sano ee soo socda.

### WAXBARASHO

Shahaadada dugsiga sare ama tan dadka waaweyn ayaa la weydiin karaa qofkii raba in uu noqdo Caawiye Kalkaaliye. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

### LEYSANKA SHAQADA

Ma jiraan wax leysan daryeele ah oo la isaga baahan yahay.

### AQOONSIGA SHAQADA

Goobaha shaqada qaarkood waxay rabaan shahaado ah aqoonsi xirfadeed si loogu shaqeeyo. Badanaa goobaha shaqada waxay dadka shaqaaleysiyaan ka hor ama intuu socdo tababarka iyo imtixaanka Caawiyaha Kalkaalinta. Qaar badan oo ka mid ah goobaha shaqada ee waayeelka waxay dadka ka bixiyaan ama u celiyaan lacagta shaqaaluhu ku bixiyaan tababarka iyo imtixaanaadka. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato in lagugu qoro Diwaanka Caawiyaha Kalkaalinta, oo ah liis lagu qoro Caawiyeyaasha Kalkaalinta ee buuxiya shuruudaha tababarka Minnesota iyo/ama imtixaanka si ay uga shaqeeyaan guryaha dadka xanuunsan iyo deegaanka haysta shatiga. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

### BAARITAANKA SHAQAALAHA

Qof kasta oo ka shaqeeya guryo ah deegaan dadka lagu caawiyo noloshooda, guryaha dadka xanuunsan ama xarumo kale oo ah kuwa daryeelka muddada-dheer waa in laga soo baaro dembiyo hore sida uu dhigayo sharciga gobolka.

### XIRFADAHA LUQADDA

Inta lagu jiro wareysiga shaqada, weydii shaqo-bixiyaha heer aqooneedka af-Ingiriisiga ee loo baahan yahay iyo sida xirfadahaaga luuqadeed dadka kale uga faa'iideyn karaan.

### KOBCINTA SHAKHSIYEED

Waxaa jira fursado ah kobcid shakhsiyeed ka dib marka uu qof yeesho khibrad badan oo ah Caawiyaha Kalkaalinta. Waxaa jira deeqo waxbarasho oo ay gobolku ku taageeraan waxbarashada si ay dadku ugu helaan xirfadaha daryeelka muddo-dheer. Marmar ayey shaqadu bixineysaa kharashka tababar ah aqoonsiga xirfado caafimaad oo aad u sarreeya oo lagu helo lacagta badan. Inta lagu jiro wareysigaaga weydiiso shaqada goobta shaqada fursadaha koboca shaqada.

# Caawiyaha Kalkaalinta


## MUSHAARKA

Dadka ku shaqeeya Caawiyaha Kalkaalinta ee Minnesota waxay caadi ahaan qaataan \$19.45 ilaa \$23.52 saacaddii bishii Maaj 2025. Mushaarku waxa uu ku saleysan yaha meesha looga nool yahay gobolka.

## HAWLAHA SHAQADA MAALINTII

- Cunto-siin, qubeys, lebbis, shanlo, iyo caawimaad ah dadka u baahan isticmaalidda musqusha.
- Caawin ah wareejinta dadka ee meel ilaa meel kale, sida qolka ka baxaya guriga oo aadaya goobta lagu cunteeyo.
- Hagaajinta isticmaalka sariiraha, kuraasta, ama goobaha kale; In la qabto dadka si loo hubiyo in ay helaan qaabka saxda ah ama badqabidda u leh.
- Qorista cabbirka dhiigkarka ama qandhada, in lala soco si loo ogaado dhibaataada caafimaadka.
- Warbixin wixii isbeddela oo ah jirka iyo/ama maskaxda ee dadka si loogu caawiyo baarista wixii jira ama daaweynta.

**Daawo fiidiyow ku baxaya afka Ingiriiska oo ku saabsan waxa ay qabtaan Caawiyaha Kalkaalinta.**



- Qiimeynta jirka ee dadka si loogu caawiyo baarista wixii jira ama daaweynta.
- Nadiifinta qolalka dadka, iyo beddelka gogosha sariiraha.
- Fulinta daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ama daaweynta.
- Siinta daawooyinka ama tallaallada, iyadoo ay kormeerayaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee shatiga haysta.
- In lagu shaqeeyo qalabka caafimaadka sida wiishka iyo sariiraha.
- In dadka lagu caawiyo faashadaha, dhaymada, ama qalabka kabista.
- In dadka loo sharxo macluumaadka caafimaadka.

## SIDA LOO HELO SHAQADA CAAWIYAHA KALKAALINTA

Kala hadal shaqaalaha xafiiska CareerForce ee goobta kuugu dhow:

- Booqo [CareerForce.MN.gov/locations](https://www.careerforce.mn.gov/locations)
  - Soo garaac 651-259-7500
- Toos ula xirii goobaha shaqada:
- Shaqooyin ka baaro liiska [CareerForce.MN.gov/job-search](https://www.careerforce.mn.gov/job-search)
  - Booqo [CaringCareersStartHere.com](https://www.caringcareersstarthere.com)

**CareerForce.MN.gov/CaringCareer**

651-259-7500 – Turjubaan ayaa loo diyaarinayaa qofkii naga soo socda.